

Aaway Nora caageedii
ay barafka ku dul raaci
jirtay?

Qoraalka iyo sawirada:


Elmira Zadissa

Ramona Zadissa






Ugu danbayntii waxaa yimi xiligii qaboobaha.
Nora daagada ayay taagan tahay. Waxay
daawanaysaa barafka da'aya oo dhibco
waaweyn iyo kuwo yar yar isugu jira.



Nora saaxiibadeed ayaa banaanka
ku ciyaaraya barafka.




Iyagoo saaran caagan barafka dushiisa lagu raaco
ayay daagadeeda meel u g'how dhagso u dhaafayaan.



- Oo aniga caagaygii aan barafka ku raaci jiray meeyey? ayay ku fekertay Nora.



- Kolay istoodhka hoose ayuu yaalaa. Yalla!
Inakeen aan hoos u degno oo soo raadinee,
ayuu yidhi aabe.



Bakhaar

-Jaqaf-

Jaqaf

Jaqaf

Istoo dhka ku yaal guriga hoostiisa ayay
Nora, aabe iyo nuunuugii yaraa u degeen.



Waa mugdi istoodhku.

Waxyaabo badan ayaa yaala.

Waxaa yaala Waxyaabo waaweyn
qaar yar yar iyo...

...Wayaboo dan caadi ahayn.

Laakiin aabe ma arko wax
dan caadi ahayn





Wuu

raadiyay oo

raadiyay uun...

-Maxaad ka heshay Halkaa aabo?
Ma waxaad heshay
bahalkii istoodhka.





Xagee buu ka yimi wuxu?
Ayu ku dhawaaqay aabe.

HAYAAAY!!!

- Ha baqanin aabe!


Aniga ayaa ku
caawinayee.



Nora ayaa aayar xagii
bahalka istoodhka u dhagaagaysa.



-Aabo waxani
maaha bahal-istoodh,
ayay tidhi Nora.





-Waa runtaa!
ayuu yidhi aabe isagoo qoslaya.

Aabe wuu iska sii
waday raadintii Nora
caageedii ay barafka ku
dul raaci lahayd.



Sug... sug...
Waa maxay waxaasi.


- Jiir weyn!!!

...Oo aad u uraya!



- Alla. Qadhmuunaa!
ayuu yidhi aabe.

Laakiin waxaan u
malaynayaa in jirkaa
weyni uu yahay



uun kabihii kubada
cagta ee walaashayda
iga weyn.



Aabe wuxuu ka raadiyey...

...xaga sare...

...iyo...

...xaga hoose...

...meel kasta laakiin ma uusan helin
caagii barafka lagu dul raaci jirey.

Waa maxay waxa meesha
madow ku dhuumanayaa?

Iska eeg aabo!
nibiriga
cadhaysan!!!



- Nibiri cadhaysanaa?
Oo muxuu la cadhaysan yahay?
ayuu kor u yidhi aabo.

- Waxaan u malaynayaa inaad
hurdadiisii ka kicisay.



-Ha, ha. Ma aha waxani nibiri.
Eeg, waa uun roog gaboobay! ayay tiri Nora.



Aabe wuu yara neefsanayaa:

-Mar hore ayaan hawsha
dhamayn lahayn haddii aad i
caawin lahayd intaad mar
walba iga bajinaysid.



Nora waxay bilawday inay caawiso aabeheed.
Meel kasta way ka baareen.

Jaakada hooyo dabadeeda



Shandada cagaaran
ee safarka gudaheeda

iyo toobka cas

hoostiisa xitaa.

Laakiin midkoodna Nora iyo aabeheed toona
muu helin caagii barafka lagu dul raaci jiray.



Nuunuugii wax buu helay malaa.



- Aabo ka leexo! Waa bahalkii dabka neefsan jiray ee yara sirgaxanaa ama cawejka ahaa, ayay tiri Nora.



-Maaay! Bahalkii dabka neefsanayey ma joogo halkan. Laakiin ma garanaysaa waxani wuxuu yahay? ayuu weydiiyay aabe.

Caagaygii aan barafka ku dul raaci jiray!!!

Caagaygii fiicnaa!

Aad iyo aad baan kuu tebey!





Haddii ay yaalaan waxyaabo yaab
lihi istoodhka, hayska yaaleen
halkaa.



Ugu danbayntii waxay heshay Nora
caageedii ay barafka ku raaci jirtay,
oo inay si degdega banaanka ugu
baxdo ayuun bay doonaysaa.

Eeg aabo! Waxaan haystaa caaga barafka lagu raaco ee aduunka ugu fiican! ayay kor u tiri Nora iyadoo xoog uga soo siibaynaysa degaandega buurta barafka ah.





Waxaa akhriyaya sheekada:
Omer Aden
Tarjume: A. Rashid Dahir